



# Dib U Dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg



## Dugsiyo Dhexe oo Noocoodu Cusub Yahay

Waxaa la furi doonaa xilliga dayrta sanadka 2021, dugsiga dhexe Kellogg oo cusub kaasi oo ka tarjumaya aragtida cusub ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ay ku abuurayaan nooc cusub oo waxbarashada dugsiyada dhexe, kuwaasi oo siinaya ardayda barnaamijyo badiilo ah oo aad loo ballaariyey.

Hawshani waxa ay qeyb ka tahay habka lagaga qeybqaadanayo bulshada kala gedeisan waxa ay wadaagaan ee himilooyinkooda iyo rabitaankoodani cusub ee dugsiga dhexe kuna yaala dariskooda. Goobta uu ku yaal Kellogg waxa laga dhisayaa dhisme cabirkisu yahay 100,000 sq.ft. oo dhismo cusub ah, waxaana ka mid ah masrax farshaxanka lagu soo bandhigo, qolka jimicsiga oo loo isticmaalayo ujeedooyin kala gediyan iyo goob ardaydu ku soo bandhigto hibooyinkeeda gaarka ah, goob aad u ballaaran oo ardayda iyo bulshadu ku kulanto, iyo goobo bannaanka iskuulka ah oo loo hibeeeyey inay ardaydu wax ku bartaan. Iskuulku wuxuu isku xiri doonaa darisyada Koonfur-bari ee Portland, isaga oo noqon doono xarun bixisa waxbarasho cusub oo xudun u noqota in ay bulshadu ka heli karto waxyabaha ay u baahan tahay.

Inkastoo Dugsigii Dhexe Kellogg la burburiyey, haddana waxaa la xafiday qeybo ka mid ah oo lagu kordhin doono dhismahan cusub ee la dhisayo, iyada oo la karaameynayo xusuusihii uu lahaa dhismihii hore ee taariikhed iyo iskuulka musqabalka soo socda.



## Waqtiga Mashruucu Soconayo

### GU'GA 2017 – GU'GA 2019

#### Qorsheynta iyo Naqshadeynta

Qorsheynta Guud / Naqshadeynta  
Qaabdhismeedka / Heerarka Kala Gedisan  
Naqshada iyo Shaqada Marto /  
Dukumentiyada Dhismaha

### XAGGAAGA 2019 – XAGGAAGA 2021

#### Dhismaha

Dhismuhu wuxuu qaadan doonaa muddo labo sano ku dhow.

### DAYRTA 2021

#### Dib u Dhiska Dugsiga Dhexe ee Kellogg Iskuulku wuxuu furmayaa

## Makhaayada/ Goobaha dadku wada isticmaali karaan

Makhaayada/Goobaha dadku wada isticmaali karaan wax ay u addeegaan iyaga oo ah goobaha ugu muhiimsan ee udub dhaxaadka u ah dugsiga dhexe ee cusub, sidoo kalena waxaa ardayda ay ka helayaa goobo ay iskugu yimaadaan iyo inay bulshadu ku kulanto kuna qabsato hawlaheeda kale gediyan marka uu dhammaado waxbarashada iskuulku maalintii.

## Fasalo Waxbarasho oo isku xiran

Iyada oo tahay qeybo ka mid ah jawiga waxbarasho ee la wadaagayo, fasalo doora ah ayaa la isku xiri doonaa dabaq kasta; ilaa la gaarsiyo goobta waxbarashada si loo horumariyo iskaashi ballaaran.

## Masraxa Farshaxanka

Masraxa lagu soo bandhigo farshaxanada kala duwani wuxuu ku yaalaa oo uu ku dhegan yahay qolka miisikada loogu talagalay, kaasi oo loo addeegsanayo goob wax lagu barto, kaasi oo u sii furan qolka jimicsiga ilaa inta laga gaarayo qeybaha kala qeybiya ee codkana hoos u dhiga, si aanu codku ugu gudbin qeybaha kale ee dhismaha, waxaa laga helayaa goobo lagu sameeyo bandhigaya kale gediyan, ardayda iskuulkuna ku kulmaan iyo munaasabadaha kale ee ay bulshadu dhiganayaan.

## Agab Bulsheed

Naqshada iskuulka markii la sameynayey waxaa qeyb ka ahaa bulshada dariska la ah iskuulka, iyaga oo taageeray goobaha siinaya isku xirka dariska xarunta dhexe ee iskuulka cusub.

## Goobaha Ciyaarahaa Kala Gedisan

Si kulanada ardaydu ku kulmaan loogu isticmaalo, iyaga oo bandhigyo ku muujinaya ayaa qolka jimicsiga ciyaarahaa ay u ogolaadeen in labo fasal oo waxbarashada dhismaha jirka(PE) u isticmaalan goobtaas isla hal mar; waxaana lagu kala qeybin daahyo. Bannaanka iskuulka, garoon isaguna siyaboo kala gediyan loo isticmaali karo iyo dariiqyo lagu lugayn karo, iyadoo lagu qabanayo jimicsiyo jirka oo kala duwan iyo ugu dambeyn in ay bulshada dariska iskuulku marka la xiro ay isticmaasho.

## Shaybaarka STEAM /Beer tijaabeed wax lagu barto

Shaybaarka STEAM, wuxuu ku dhegan yahay beerta tijaabada ee ardaydu wax ku barato, iyada oo loo isticmaali doono sidii hawlaho gacanta laga qabanayo loogu addeegsan lahaa iyo waliba fursadaha ku salaysan mashaariicda barashada. Beerta tijaabada barashada waxa ay ku sii xiran tahay fasalada bannaanka u xiga oo leh goobo ay yaalaan dhagax waaweyn oo lagu fariisto, waxaa iyaguna yaala qalab lagu soo bandhigayo sida loo abuuro tamarta iyo waliba goobo lagu beero geedo loogu talo galay in wax laga barto.

## Dhisme Loo Istinmaalayo Goob Waxbarasho

Dhismuhu sida uu dhan yahay waxaa loo addeegsan doonaa goobo waxbarasho oo wax lagu barto isticmaalka barashada tamarta iyo joogtaynta tamarta. Waxaa lagu muujin doono boodh wirwiraya oo kuu sheegaya inta tamar la isticmaalay iyo inta la soo saaray tamar ee xogta waqtiga dhabta ah, yamxeerinta biyaha iyo tay'ada hawada ee dhismaha oo ilaaliyo. Waxyabahani ayaa lagu daray waxa ay kor u qaadayaan waayo-aragnimada waxbarashada.



MUSTAQBALKEEDA SI WADAJIR AH U DHISAYNA.

<http://pps.net/KelloggBond> • [KelloggBond@pps.net](mailto:KelloggBond@pps.net) • 503-916-2222

[f www.facebook.com/pps.homepage/](https://www.facebook.com/pps.homepage/) [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Portland Public Schools  
School Building Improvement Bond



*Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.*